

Kun habeen iyo habeen

Sheekadani waa sheekadii caan baxday ee carbeed lana odhan jiray kun habeen iyo habeen.

Beri baa waxaa jiri jiray nin boqor ah oo boqortooyo aad u balaaran xukumi jiray . waxaa la yirii Xaaskii oo boqoraddii waddanka ah, ayaa ka xumaatay oo gogol dhaaf sameesay. waxaa la yidhi boqoradii ayuu ku xukumay in kurka laga gooyo , oo la dilo, sidiibaana lagu dilay. Boqorkii, ayaa maalintii danbe wuxuu u yeethay wasiirkii wasiirradiisa ugu sareeyay, waxaanu ku amray inuu habeen walba gabadh ugub ah oo uu guursado u keeno, sidii ayuu wasiirkii ku yeelay amarkii boqorka oo uu habeenkii ugu horeesay u keenay gabadh u gub ah oo aad iyo aad u quruxbadan. Boqorkii ayaa habeenkii gabadhii la aqal galay oo loo sameeyay aroosa aad u heersareeya. Aroortii markii la soo toosay ayaa wuxuu amray in gabadha kurka laga gooyo , halkaasaa gabadhii aroosada ahayd lagu dilay. Markii wasiirradii waydiiyeen sababta uu gabadha u dilayna wuxuu yidhi " si aan gabadh kale oo danbe ii kхиyaamin, habeen walba gabadh baan la aqal galayaa aroortiina waa in la dilaa" Hadana maalintii danbe ayaa gabadh kale loo keenay markaasuu habeenimadii la aqal galay, aroornimadiina sidii tii hore ayuu dil ugu xukumay. Markii u muddo sadex sanadood ah u waday, ayaa wadankii habliihii ugubka ahaa noqdeen wax la dilay iyo wax wadankii ka orday oo uu waalidkood la baxsaday. Maalintii danbe ayuu ninkii wasiirka ahaa uu magaaladii oo dhan ka soo waayay gabadh ugub ah oo uu u geeyo boqorka, isagoo aad u wareeraya oo ka baqanaya boqorka oo ku adkeeyay in hadii uu habeen qudha gabadh u keeni waayo in isna kurka laga goyn doono ayaa gurigiisi ku soo noqday wasiirku wuxuu dhalay laba hablood oo aad u quruxbadan oo la kala odhan jiray Sahrasaad iyo Dunyasaad , waxayna ahaayeen laba hablood oo aad u edeb badan, maskax iyo fahmona ilaahay ku manaystay , waxay ahaayeen laba gabdhood oo si fiican wax u bartay Gabadha

wayn ee sahrasaad oo ku tukhusustay suugaan iyo luqadaha waxay haysay sheekoojin aad u badan. waxaanay lahayd hibo ah curinta sheekoojinka khayaalka ah, oo ay si heer sare ah oo aan laga xiiso go, ayn ay u curin jirtay. Sahrasaad ayaa aabaheed ku tidhi " aabo maanta maxaa kugu dhacay aad baad u murugaysan tahayee?" markasu wasiirkii u sheegay arintiisi iyo sida uu boqorku u amray ee uu ka doonayo. Sahrasaad ayaa tidhi "aabo ha warwarinee aniga ii gee ha i guursadee boqorkuye" waxaanay tidhi hadii aabo ilaahay ila qabto aniga ayaa badbaadinaya hablaha ugubka ah ee waddankeena . wasiirkii ayaa inantiisi ku yidhi " aabo, kuuma quudho inaan ku waayo oo kurka lagaa gooyo , markaa waa in aan wadanka ka baxsanaa oo aynu sida ugu deg-dega badan u baxnaa. Sahrasaad ayaa tidhi " maya aabo aniga ii gee boqorka oo ii dhis caawa, aniga ayaa aqaana sida aan uga badbaadayee" Sidii ayaa sahrasaad loogu geeyay boqorkii oo habeenimadii arooskii loo qabanqaabiyay boqorkii ayaa aad iyo aad ugu farxay markii loo keenay inantii wasiirka oo quruxdeed dadkoo dhani isla dhex mari jireen. Markii boqorka loo sii galbinayay, ayey walaasheed dunyasaad la sii dardaarantay oo ay la sii balanta oo ay ku tidhi " walaal marka boqorka la ii geeyo ayaan waxaan boqorka ka codsan doonaa in la ii kaa keno oo aad ii wehelyeesho , markaa marka ay habeen noqoto , waxaad igu tidhaah , walaal habeenka hortenu wuu dheeryahayee maad sheekoojinkaagii xiisaha lahaa inoogu maaweelelid. Sidii ayaa sahrasaad boqorkii loogu geeyay oo aroos aad iyo aad u wanaagsani loogu sameeyay. markii boqorkii la horgeeyay ayey tidhi "Boqorkaygiyaw qaaliga ahaayaw, waxaan kaa codsanayaa inaad ii ogolaato in gabadha iga yar ee aanu walaalaha nahay, ee dunyasaad ila joogto aan caawa weheshado boqorkiina codsigaas wuu ka ogolaaday markii ay habeen noqotay ayeey dunyasaad ku tidhi walaasheed sahrasaad walaal habeenku wuu dheeryahayee ee maad sheekoojinkaagii xiisaha lahaa ee macaana inoogu mawaaliseed caawa. shawrasaad ayaa sheekadii bilaw markaasuu boqorkii xiiso aad iyo aad ah u qabtay sheekadii, oo uu ku dhegedhegegay macaankii sheekada oo siduu u dhagaysanayay gacanta

dhabanka saaray oo uu dhankaa iyo dhankaa dhinac dayi waayay. Markii waaberigii soo dhawaaday, ee ay sheekadii meeshii ugu xiisaha badnayd marayso oo uu boqorkii is leeyahay , maxaa ku xigi doona, ayey sahrasaad tidhi " boqorkaygiyaw waagii ayaa soo beryay ee sheekadu halkaa ha inoogu joogta oo aynu seexano". Boqorkii oo aad iyo aad u xiisaynaya sheekada , oo meel aad u wanaagsan u maraysay, ayaa halkaa ku nabad galiyay sahrasaad habeenkii u horaysay. sidii ayey muddo kun habeen iyo habeen ugu sheekaynaysay, oo uu boqorii siduu habeen walba isku lahaa bal horta sheekadan macaan ha kuu dhamayso oo ogow halka ay sheekadu ku dhamaatay, ayeey la fogaatay oo ku qaadatay kun habeen.



Illustrasjon: Adryanah / Pixabay